

## **Waa kuma Guddoomiyaha Arrimaha Carruurta ee Wales?**

Keith Towler waa Guddoomiyaha Arrimaha Carruurta ee Wales. Shaqada Keith waa in u difaaco oo u doodo carruurta iyo dadka dhallinyarada ah. Waxa u shaqeeyaa in u hubiyo inay carruurta iyo dhallinyaradu badbaadaan, ooy ogaadaan waxa ku saabsan xuquuqdooda oo marin u heli karaan.

Keith ayaa ah in dhammaan shaqooyinka u qabto u ku tixgaliyo xuquuqaha carruurta iyo Xeerka Qaramada Midoobobey ee ku saabsan Xuquuqaha Ilmaha. Taas micnaheedu waa iyada oo ay jiraan hawlo badan oo la qabto, markaa Keith ayaa leh dad badan oo isaga caawiya. Waxay shaqadooda ka fuliyaan laba xafiis, midk ku yaal Swansea iyo mid ku yaal Colwyn Bay.

## **Maxaynu Guddoomiyaha Arrimaha Carruurta ugu leenahay gudaha Wales ?**

Ururada carruurta ayaa u ololeeyey in ka badan 10 sano in la sameeyo guddoomiyaha arrimaha carruurta. Siyaasiyiinta Golaha Qaranka Wales ayaa iyaguna waliba jeclaa fikradda. Waxay doonayeen qof u hadla oo dhowra xuquuqaha carruurta iyo dhallinyarada.

Horraantii 2000, Sir Ronald Waterhouse ayaa soo saaray warbixintiisii 'Lost in Care' (Ku dhex lumay Drayeelka) kadib markii baaritaan dheer lagu sameeyey si-xun ula dhaqanka ilmaha guryaha carruurta lagu hayo ee Wales dhexdooda. Wuxuu talo ku soo jeediyey in Wales loo sameeyo Guddoomiye Carruur sidii la iskugu dayi lahaa oo loo joojin lahaa inayna dib u dhicin arrimahaas oo kale mar dambe. Arrintaas ayaa dedejisay olalaha oo sharci ayey soo saareen dawladda Boqortooyada Midowdey (UK) ee Westminster in booska la abuurto oo la siiyo awoodaha loo baahan yahay.

Ma rabtaa war dheeraad ah?

- [The National Assembly for Wales' proposals for a Children's Commissioner](#) (Soo-Jeedimaha Golaha Qaranka Wales sidii Loo samayn Lahaa Guddoomiyaha Arrimaha Carruurta)
- [Care Standards Act 2000](#) (Xeerka 2000 ee Heerarka Laga Rabo Daryeelka)
- [Children's Commissioner for Wales Act 2001](#) (Xeerka 2001 ee Guddoomiyaha Arrimaha Carruurta Wales)
- Waxaad ka raadsan kartaa sharciyada kale [halkan](#)